



Macallin ka tirsan Dugsiga Hoose ee Whitman oo heshay Abaalmarinta Macallinka ee Milken oo dhan \$25,000

Markii Janet Do ay timiday shaqada ay ka hayso Dugsiga Hoose ee Whitman maalintii Isniintii, wax fikrad ah kama haysanin waxa iyada sugayay. Do, oo ah macallimada fasalka koowaad, ayaa la siiyay Abaalmarinta Macallinka ee Milken oo dhan \$25,000 taasi oo ahayd munaasabad aan la filayn oo ka dhacday dugsiga Koonfurta-bari ee Portland.

Munaasabadda waxaa ku jiray Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero iyo Madaxa Dugsiyada Kregg Cuellar iyo sidoo kale Carmen Xiomara Urbina, agaamise ku-xigeenka Waaxda Waxbarashada ee Oregon.

“Waa macallimad fiican,” ayay sheegtay Helen Nolen, oo ah maamulaha ku meel gaarka ah ee Whitman. “Waxay si fiican ula shaqeysaa asxaabteeda, waa qof aad loo ixtiraamo waxayna qabanaysaa shaqo wanaagsan oo ah dhisida bulsho wax barayaal ah .”

[Abaalmarinada Macallinka ee Milken](#), oo loogu talagalay macallimiinta K-12, waxaa 30 sano ka hor abuuray Ururka Qoyska ee Milken. Waxa bartilmaameedsadaan “xirfadlayaasha xirfadaha waxbarashada ee hore-ila-dhexe taasi oo loogu talagalay guul gaaridooda wanaagsan iyo, ta ugu muhiimsan, oo loogu talagalay ballanqaad waxa ay gaari doonaan mustaqbalka.” Marka lagu daro abaalmarinta lacageed, dadka ku guuleystay waxay awood u yeeshaan in ay helaan qalabka wax isku xirka iyo horumarinta inta ay ku jiraan xirfadahooga.

Milkens waxaa mararka qaarkood loo yaqaan "Oscars of Teaching" sababta oo ah waxaa lagu soo bandhigaa munaasabaddo aan la filaynin. Masharixiinta waxaa la aqoonsaday iyada oo la marayo nidaam qarsoodi ah, iyada oo macallimiintuna aysan codsan karin isla markaana aysan ka warqabin in tixgelin la siinayo. Waxaa lagu qiimeeya in ay buuxiyaan [koox shuruudo ah](#) oo ay soo diyaarisay guddi ay magacawday waaxda waxbarashada ee gobolka, iyada oo oggolaanshaha kama dambeysta ahna uu bixiyo ururku.

Do waxay noqotay macallimadii 12-aad ee ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland oo ku guuleysata Milken. Ku guuleystayaashii hore ee PPS (dugsiyada qaarkood waxay bedeleen magacyo ama maba aha kuwo hadda jira):

- Teresa Chan Seidel, Dugsiga Dhexe ee Robert Gray, 2013
- Dr. Bonnie E. Robb, Dugsiga Clark, 2008
- Elisa Schorr, Pursuit of Wellness Education ee Dugsiga Sare ee Roosevelt, 2007
- Tamala M.W. Newsome, Dugsiga Hoose ee John Ball, 2004
- Judy Madden Bryant, Dugsiha Hoose ee Humboldt, 2002
- Cynthia MacLeod, Dugsiga Hoose ee Sabin, 1996

- Michael Jordan, Xarunta Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Sabin, 1994
- Robin Lindsley, Dugsiga Hoose ee Boise-Eliot, 1994
- Alcena Boozer, Dugsiga Sare ee Jefferson, 1993
- Betty Campbell, Dugsiga Hoose ee Boise-Eliot, 1991
- Deanna Woods, Dugsiga Sare ee Wilson, 1991